DOWLADDA PUNTLAND EE BOOMAALIYA

GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

## SOLICITOR GENERAL OFFICE

## مكتب المحامي العام للدولة

# SHARCIGA KHIDMADDA ILAALINTA AMNIGA GAROOMADA DIYAARADAHA EE DOWLADDA PUNTLAND

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZAETTE

## الجريدة الرسمية

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Puntland, Address: Madaxtooyada Puntland, Garowe
Email:gg.pl@plstate.so

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| | | | |
|---|---|---|---|
| SANADKA 19AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 08/10/2019 | Lam. 02 |


# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA KHIDMADDA ILAALINTA AMNIGA GAROOMADA DIYAARADAHA EE DOWLADDA PUNTLAND

## TUSMADA

| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Khidmadda ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradah ee Dowladda Puntland.** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.3 ee August 10, 2019, kuna saabsan sharciga Khidmadda Ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha ee Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/71/2019, kuna taariikhaysan 20/07/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**Wuxuu soo saaray**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeeyn Xeerka **Khidmadda Ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha** ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr. Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Tel: +252-90-7790151, E- Mail: [illegible]@gmail.com, E-mail: DG.oop@plstate.so; oop@plstate.so; **Website**: www.plstate.so;

*Ref:*-XGGW/DPL/ 71 /2019 Garoowe, Sabti Date:- 20/07/2019

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixin Khidmadda ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha Puntland.**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha **Ref:** MW/DPS/623/2018 ee August 23,2018 kuna saabsan soo gudbin Khidmadda ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha Dawladda Puntland.

**MARKUU TIXGELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta Khidmadda ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 44-aad Fadhigiisii 18-aad ee **18/07/2019** Khidmadda ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha Puntland.

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

**Ansixinta Khidmadda ilaalinta Amniga Garoomada Diyaaradaha Dawladda Puntland.**

Allaa Mahad Leh

**Md. Cabdixakiin Maxamed Axmed (Dhgobo)**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

**HESHIIS U DHAXEEYA**

**WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA PUNTLAND**

**IYO**

**SHIRKADDA MAAREYNTA KHATARAHA GEESKA EE (HRM)**

**F.G: Heshiiskan waa Heshiis hore oo wax ka bedel sixid ah lagu sameeyey ka dib talo soo jeedin ka timi Guddiga Howlaha Guud, Ganacsiga iyo Kaabayaasha Dhaqaalaha ee Golaha Wakiillada.**

**Heshiis Number: 01/SE/06(WDH&G&HRM**

**Xilliga uu Dhaqan gelayo: 17/02/2016**

## Heshiis Adeeg bixin

Heshiiskan adeeg waxaa kala saxiixday **WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA iyo SHIRKADDA MAAREYNTA KHATARAHA GEESKA EE (HRM).**

**Heshiiskaan waxaana lakala Saxiixday 01-Febuary-2016.**

1. **WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA (WDH&G)** ee Puntland, Wasaaraddu waxay masuul ka tahay maamulka duulista hawada iyo adeegyada garoomada ee Puntland, waxaa kaloo ay masuul ka tahay diyaarinta, qaabeynta iyo maamulka siyaasadaha garoomada ee Puntland. Waajibaadkeeda shaqo waxaa kaloo ku jira la socodka dadka maraya garoomada, adeegga casriga ah ee garoomada, adeegga qaadista rakaabka iyo alaabtooda.

2. **SHIRKADDA MAAREYNTA KHATARAHA GEESKA EE (HRM)**, waa shirkad gaar loo leeyahay sida uu qabo sharciga dawladda Puntland, tirsigiisa diiwaana uu yahay **WDH&/XW/11/2015 (Puntland)** iyo shatiga ganacsiga **Lr: G/N226** oo ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo warshadaha, Shirkadda HRM xarunteedu waxay ku taalaa Garoowe.

Wasaaradda duulista hawadda iyo Garoomada iyo Shirkadda HRM waxaa heshiiskaan loo tixraacayaa midkiiba **"hal dhinac"**, markii ay wada jiraan waxaa loo tixraacayaa **"dhinacyo"**.

b) Ayadoo ay Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed raacayso heshiiskii ICAO ee la saxiixay 1944, Chicago Convention. Dawladda Puntland waxay waajibaadka kowaad u ah ilaalinta rakaabka, wadayaasha diyaaraddaha, shaqaalaha garoomadda iyo guud ahaan shacabka, in ay ka ilaaliso wax kasta oo ah danbi ama khatar ku ah garoomada.

t) Dawladda Puntland waxay aaminsan tahay muhiimadda garoomadu leeyihiin kaliya ma aha isku xirka adduunka iyo Puntland ee sidoo kale waa soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah.

j) Dawladda Puntland waxay si dhab ah ula socotaa amniga hawada, waxayna hirgalinaysaa tallaabo kasta oo lagu ilaalinayo amniga hawada iyo garoomada, khataraha iman kara ama dhaawici kara ammaanka garoomada iyo habsami u socodka duulimaadka, HRM waa in ay si adag u baarta dadka dhoofaya ee diyaaradaha raacaya.

## Hordhaca Heshiiska

B) Wasaaradda Duulista Hawada iyo Garoomadu waxay heshiis la gashay Shirkadda HRM si ay u bixiso adeegga amniga gudaha garoomada Puntland (Terminals).

T) Shirkadda HRM waxay aqbashay dhammaan qodobada heshiiskan, kaas oo ay ballan qaaday in ay bixinayso adeegga amniga garoomada sida ku cad faahfaahinta qodobada heshiiskan.

## Heshiiska Adeegga Amniga Garoomada

1.1. Shirkadda HRM waxay bixinaysaa adeegga amniga dhammaan garoomada Puntland, iyadoo ay wakiil uga tahay Wasaarada Duulista hawada iyo Garoomada Puntland.

Ujeedka sugidda amniga garoomada ayaa ah in laga hortago khatar walba iyo xaalad walba oo amni oo dhici karta, Hadafka ayaa ah in la joojyo khatarta, dadka iyo alaabta sifada sharci daradda ah ku soo galaya dalka soona galaya garoomada iyo diyaaradaha.

## Mas'uuliyadda Shirkadda HRM ee Heshiiskan

2.1 Maamulidda Bar kantaroollada garoomada, baarista qofkasta oo soo galaya garoonka diyaaradaha iyo agabkiisa.

2.2 Ku xirridda iyo hawl galinta qalab casri ah, sida qalabka la dhexmaro ee ka baara rakaabka hubka, mashiinada boorsooyinka lugu baaro, Mashiinada xadida ilaaliyana dhaqdhaqaaqa dadka, dhoofayaasha iyo kaamarooyinka casriga ah ee xogta aruuriya iyo kuwo sida qarsoon wax u baara.

2.3 Qorista shaqaalaha u shaqeeya shirkada, ruqsayntooda, tababaradooda, isku bedelkooda, u kala qaybinta shaqada, kormeerka shaqada, dallacsiinta iyo ganaaxa shaqaalaha iyada oo la tashanaysa Wasaaradda duulista hawada iyo Garoomada, iyo u samaynta dhammaan shaqaalaha garoonka ee wasaarada iyo shaqaalaha kale ee garoomada ka hawl gala kaararka galista garoonka (Gate Pass).

2.4 In shirkadda HRM ay si dhow ula shaqeyso hay'adaha fulinta ee garoomada.

2.5 In ay Shirkada HRM la timaado Heshiis caymis oo faahfaahsan, muujinayana caymis dhammaystiran naf iyo maalba.

**Khidmadda iyo Aruurinteeda**

2.6 Khidmadda baarista rakaabka diyaaradaha ee Dowladda Puntland iyo Shirkadda HRM waxaa aruurinaya Shirkaddaha Diyaaradaha, taasoo dhan **USD 18 (Sideed iyo Toban dollar oo kaliya),** qofkasta oo dhoofayaba.

2.7 Khidmadu waa **$3** oo ay Leedahay Dawladda Puntland iyo $15 ay leedahay.shirkadda HRM

2.8 Khidmadahaas waxaa laga qaadayaa dhammaan rakaabka ka dhoofaya garoomada Dawladda Puntland, marka laga reebo Duulimaadka gudaha Puntland meel kasta oo ay ku yaaliin, isla markaasna waxaa lagu amrayaa in rakaabku ay u hoggaan samaan baaristaas.

2.9 Shirkaddaha diyaaradaha waxaa ay masuul ka yihiin soo aruurinta khidmadda, iyagoo ku wareejinaya HRM.

2.10 Khidmadan lagama qaadi karo dadka lagu riixayo Gaari gacanka (wheel chair).

2.11 Khidmadan lagama qaadi karo golayaasha Dowladda Puntland ee sita Baasaboorka Dublimaasiga (Diplomacy passport).

2.12 Khidmadan lagama qaadi karo caruurta 5-ta sano ka yar.

2.13 Heshiiskan waxaa ku waajibtay bixinta cashuurta Dawladda Puntland.

**Ballan-qaad**

2.2 Shirkadda HRM waxay soo gadaysaa isla markaasna ay keenaysaa kayd qalab; kuwaasoo ka kooban alaabaha loo baahan yahay oo dhamaystiran iyo agab dheeri ah.

2.3 Dawladda Puntland waxay dammaanad qaadaysaa haddii ay heshiiskani buriso in ay bixinayso dhammaan wixii hanti ahaa oo mashruucaas ay gelisay HRM.

2.4 Dawladda waxay oggolaatay markii heshiiskani bilaabmo, in la keeno qalabka Garoomada iyagoo shaqeynaya tayo wanaagsan una diyaarsan isticmaal, isla markaasna aan lahayn wax cillad ah oo la ogyahay, laguna qeexo qoraal caddeynaya tayada qalabkaas.

2.5 Shirkadda HRM waxaa ay keenaysaa qalab kasta oo muhiim u ah nabad galyada garoomada iyadoo maraysa hab iibsi oo daahfuran, qalabkaasi waxaa ay u harayaaan Wasaaradda Haddii uu heshiisku burburo, HRM waxaa loo gudayaa hantidii ka gashay mashruuca, oo laga jaray qiima dhacii ku yimid alaabta.

2.6 Shirkadda HRM waxaa ay kormeer ahaan u hoos tagaysaa Wasaaradda Duulista hawada iyo garoomada, Waxayna u fulinayaan mashruuca si daahfuran, iyadoo diyaar u ah in ay fuliso shuruudaha dawladda Puntland ee maangalka ah.

2.7 **Wax ka bedelka;** Waxba lagama bedeli karo heshiiskan, lagumana dari karo, isagoo ahaanayaa mid shaqeeyaa ilaa ay dhinacyada heshiiskani ay saxiixaan qoraal wax ka bedel ah.

2.8 **Danaha is diidan:** Qandaraasluhu waxaa uu si xor ah u galay heshiiskan, shaqadani ma burinayso heshiis walba uu u dhaxeeya qandaraaslaha iyo daraf seddexaad Inta lugu guda jiro, qandaraasluhu waa in uu galiyaa awooddiisa iyo waqtigiisaba sidii uu uga soo bixi lahaa waajibaadka saaran.

**<u>Mag-dhow</u>**

3.1 Wasaaradda iyo shirkadda HRM heshiiska ay wada galeen mudadiisu waxaa ay dhan tahay 15 sannadood, taasoo ka bilaabanaysa muddada la saxiixay heshiiska. Dawladdu waxay bixinaysaa mag-dhaw haddii ay ka baxdo heshiiska xilli hore ama ay dhacdo in shlrkad kale la wareegto, magdhowga la siin doono shirkadda HRM waxaa kaloo heshiiskani u oggolaanayaa in shirkadda HRM loo gudo maalgalintii ka gashay mashruucan.

3.2 Haddii Shirkada HRM ka baxdo heshiiska ay la gashay Dawladda Puntland xilli hore waxay bixinaysaa mag-dhow u dhigma shaqadii ay ka gaabisay, waxayna Dawladdu heshiis la gelaysaa shirkad ka bixi karta adeegyada amniga Garoomada, iyadoo ay shlrkadani isticmaalayso qalabkii shirkadii HRM inta ay ka soo iibsanayso qalab cusub.

3.3 Heshiiskani waxaa uu u oggolaanaya in HRM ay shaqadeeda si madax bannaan u qabsato isla markaasna ula shaqeyso si dhow maamulka Garooomada, Wasaaradda iyo qaybaha kale ee dawladda.

3.4 Wasaaraddu waa in ay ku dhiirigelisaa in shirkaddaha duulimaadyadu, bixiyaan khldmadaha lagu heshiiyay ee ka soo xarooda dhammaan duulimaadka oo dhan marka laga reebo Duulimaadka Madaxtooyada.

3.5 Maamulka Shirkadda HRM waa in loo oggolaadaa si xor ah in isticmaalaan goobaha baaburta la dhigto iyo dhammaan goobaha kale ee garoonka.

3.6 Shlrkadda HRM waa in laga siiyaa xafiisyo ay ku shaqayso dhammaan garoomada Puntland meel ka tirsan garoonka, taasoo shirkaddu ay hawlaheeda shaqo ku fuliso, isla markaasna muhiim u ah amniga garoonka, rakaabka iyo diyaaradahaba.

3.7 Haddii is qabad dhaco waxaa lagu kala baxayaa maxkamadaha Dawladda Puntland.

3.8 Haddii labada daraf ee heshiiska mid rabo in uu ka baxo heshiiska waa in uu siiyaa darafka kale uga yaraan 12 bilood oo wargelin ah ka hor inta aanu heshiisku daraf ka bixln.

**<u>Ilaalinta Xogta</u>**

Cid walba oo uu heshiiskani khuseeyo , sidoo kale shaqaalahooda, dadka ayaga matala xubnaha kale ee la shaqeeya iyo wakiladooda waa in ay ixtiraamaan ilaalint macluumaadka heshiiskaan ku qoran.

Xogtaan lalama wadaagi karo cid kale oo ka madax banaan cidda ay khuseyso isl markaasna waa in lagu dadaalaa sidii loo ilaaan lahaa, lama badali karo ama si kal looma qori karo xogtaan. Iyadoo qoraal ah ama si kale ah.

**Guud ahaan heshiiska**

Heshiiskaan wuxuu ka kooban yahay dhamaan heshiiska ay isku afgarteen xubnah heshiiskaani ka dhaxeeyo taasoo ah bixin adeeg oo ay wada galen Shirkadda HRM iy Wasaaradda duulista hawada iyo Garomada.

**5. Sharciyadda qaanuuniga ah iyo Xalinta khilaafaadka**

Heshiiskaan waxaa u caddayn u yahay in uu yahay hishiis sharci ah oo dhaxmara dhinacyada heshiiskaan u dhaxeeyo, heshiiskaan waxaa lagu maamulayaa sida uu qab sharciga iyo qaanuunka u dagsan Dawladda Puntland ee Soomaliyeed.

**6. Ogolaansho**

Qofka saxiixay heshiiskaan waxaa uu caddayn u yahay in ay soo wakiisheen xubnah uu u matalo heshiiskaan sida ku cad qoraalka hoose, waa akhriyeen isla markaasna a fahmeen macluumaadka heshiiska ku qoran.

**Dhaqan galka heshiiska**

Heshiiskaan wuxuu dhaqan gelayaa marka ay meel mariyaan Golaha Wakiilad Puntland.

**WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA**

Saxiixa______________

Magaca: ILYAS OSMAN LUGATOOR

Taariikhda: 13-07-2019

W. D. H & GAROOMADA XAF. WASIIRKA DAWLADA PUNTLAND EE SOMALIA
M.O.C.A & AIRPORTS THE MINISTERS OFFICE PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**SHIRKADDA MAAREYNTA KHATARAHA GEESKA EE (HRM)**

Saxiixa ______________

Magaca: CALI JAAMAC CALI Tarikhda: 13-07-2019

HORN RISK MANAGEMENT HRM